



Wargeeska Dayrtā '23

Waxaa maalgaliyay



Communities of Practice (CoP)


Leah Irwin (*Maamulaha Barnaamijka, Early Learning*) iyo
Sandy Maldonado (*Agaasimaha Waxbarashada Caruurnimada Hore*)

Waa maxay Communities of Practice (CoP)

Bulsho Wadaagto Dan Guud (Communities of Practice, CoP) waa kooxo dadka waaweyn oo wax barato oo isugu yimaadaan si ay isu bartaan oo ay isu-caawiyaan. Waa kooxo dad ah oo wadaaga tabasho ay ka siman yihiiin, dhibatooyin jira, ama mawduuc ay danaynayaan kuwaaas oo isu-taga si ay u fuliyaan ujeedooyinka shaqsi iyo kooxba. Bulshada ma rabto oo kaliya inay caawiso xubno shakhsii ahaaneed inay horumariyaan shaqadooda, laakiin sidoo kale waxay wax ku biiriyaan bulsha weynta.

Bonnie Cox (Busy Bee's Preschool iyo Child Care) waxay wadaagaan, "Daryeel Bixiyeyaasha ilmaha, ee ka shaqeeyaa guriga iyo nooca xaaladan waxaa cajiib ah in la haysto shabakadan naloo sameeyay waanu isku gudbin karnaa qoysaska, is-taageernaa midba midka kale oo leh manhaj, ama ku kulmaan safarada dibadda. Ma aha wax aan waligay ka fikiray inaan u baahanahay laakiin waan ka faa'iidaystay. Waa mid wanaagsan inaad dareento inaadan kali ahayn."

CoPs waxay inta badan diirada saaraan wadaaga dhaqamada ugu fiican iyo caqabadaha, iyo samaynta aqoon cusub si loo hormariyo qaybta ku dhaqanka xirfada. Is-dhexgalka joogtada ah waa qayb muhiim ah oo midan kamid ah. Qaar badan oo ka mid ah CoPs waxay ku tiirsan yihiiin kulanada fool ka foolka ah iyo sidoo kale iskaashi ka wadashaqaynta deegaan ee ku salaysan websaytka si ay uwada xiriiraan, isula xiriiraan oo ay u qabtaan hawlaha bulshada.



Early Achievers waxay hormarisaa samaynta qeybaha badan ee CoPs oo ku baahsan gobolka Washington. Xirfadlayaasha waxbarashada caruurnimada hore waxay bilaabeen inay ku shiraan CoPs, iyagoo taageero ka helaya tababarayaasha Early Achievers, si ay isu taageeraan, midba midka kale wax uga bartaan, oo u horumariyaan faham qoto dheer oo ku saabsan Nidaamka Qiimaynta Tayada iyo Horumarka ee WA, Early Achievers. Waxaa jiray hogaan hormarin ahaaneed oo ficol ah iyadoo CoPs ay sii wadaan ururinta sanadba sanadka ka dambeeyaa. Horaantii, tababarayaasha Early Achievers waxay qabtaan door martigelineed oo xoogan fududeeye ahaan, midani waxay inta badan bilaabataa inay isbedesho iyadoo Xirfadlayaasha Waxbarashada Caruurnimada Hore ay qaataan door adag oo hogaaminaya oo ay isla abuuraan ajandayaal iyo shirkooda. Tababarayaasha Early Achievers waxay sii wadaan inay ka ciyaraan doorka taageerada muhiimka ah ee CoPs inay sameeyaan waxyaabo ay kamid yihiin samaynta qabashada kulano loo dhan yahay oo loo siman yahay iyagoo bixinaya adeegyo turjumaada, iyo bixinta taageerooyin saadka sida goobta sugitaanka, iwm.

Doorkan tababarayaasha Early Achievers waa mid ka mid ah taageerooyin badan oo ay heli karaan dhamaan daryeel bixiyeyaasha Early Achievers oo LACAG LA'AAN AH. MA JIRAAAN wax kharash ah oo laga qaadayo adeegyada Early Achievers, oo ay ku jiraan tababarka, la talinta caafimaadka dhimirka, taageerooyinka ganacsiga, iyo horumarinta xirfadeed* (*kharashka waxaa laga qaadi karaa tababarada kale ee la bixiyo*). Haddii aad ka shakisan tahay adeeg gaar ah ee Early Achievers, fadlan la xiriir Daryeelka Ilmaha ee Washington (Child Care Aware of Washington): childcareaware@childcareareawa.org.



Sida CoP sida caadiga ah loogu isticmaalo qeybaha waxbarashada caruurnimada hore?

Goobta waxbarashada caruurnimada hore, CoPs waxaa sameeyay macaliminta caruurnimada hore, tababarayaal, iyo hogaamiyayaal kale oo wadaaga hamiday wax barida ubadka oo ka qayb qaata habka barashada sida ugu wanagsan marka ay si joogto ah ula falgalaan una taageeraan midba midka kale. Kooxahani waxay siiyan xubnaha fursado ay wax ku bartaan midba midka kale iyo si ay u horumariyaan faham qoto dheer oo ku saabsan waxyaabaha la wadaago. Xaalado badan, waxay sidoo kale u adeegaan sidii nidaamyo taageero, iyagoo siinaya dareenka lahaanshaha iyo isku xirnaanta bulshada gudaha goobta waxbarashada caruurnimada hore. Mararka qaarkood CoPs waxay noqdaan kooxo is-xoojiya iyadoo xirfadlayaasha ay dhistaan xiriir ka dhexeeya midba midka kale ee bulshada oo ay ku casuumaan xubno cusub goobta si ay ugu biiraan oo ay si wadajir ah wax uwada bartaan. Xubnaha kooxdu waxay hogaamiyaan CoP waxayna maamulaan ajendaha iyo kulanka, iyadoo ku xiran doonitaanka iyo rabitaanka kooxda.



Dhawaan hal koox oo ka mid ah Xirfadlayaasha Waxbarashada Caruurnimada Hore ayaa u dabaal-degay sanad guuradii 10aad ee CoP ee agagaarka Thurston County! Midani waa koox kala duwan oo Daryeel Bixiyeyaal Ilmaha Qoyska ah kuwaas oo u adeegaya bulshadooda tobanaan sano oo bixiya daryeel tayo sare leh. Si wada jir ah muddo 10 sano ah waxay abuureen deegaan loo dhan yahay oo soo dhawayn leh oo waxbarasho la wadaago iyo hogaaminta la wadaago. Waa wax aad u wanaagsan in la arko awooda ay ku soo kordhiyaan waxyaabaha ay qabtaan, bulshadooda, iyo midba midka kale! Xaqiiqdii waa horyaalada daryeelka iyo waxbarashadeena caruurnimada hore. CCA ee WA waxay heshay fursad ay ku wareysato dhawr iyaga kamid ah oo ay wax badan ka ogaato shaqadooda!

Deb Walters (Puddle Jumpers) ayaa la wadaagtay in faa'iidooyinka CoP ay badan yihiin. Waxay sheegtay "Halka shay ee ka maqnaa uu ahaa bulshada. Waxaa jiray dareenkan ah inaad kaligaa ka shaqaynaysay jasiirad. In la awoodo in la isu keeno si loola shaqeeyo daryeel bixiyeyasha kale ee qabanaya shaqooyin la mid ah waxay ahayd mid cajiib ah. Daqiqadahaas "alaa midaasi ma sidaas ayaad u sameysaa!" waxay ahayd mid muhiim ah. Taageerada daryeel bixiyeyasha saaxiibada ah, kuwaas oo wadaaga jacaylka ay u qabaan daryeel, waa waxa ugu weyn. Dhamaanteen waxaan isku waafaqsanahay qaybta ugu wanaagsan ee Early Achievers waa CoP yada." Waxay ku dhiirigelisaa dadka kale inay la hadlaan tababarayaashooda CCA ee WA; Waa kuwa cajiib ah, waana waxa ugu horeysa. Halkaa waxa ay kaa caawin karaan in lagugu bilaabo [CoP]. Marka aad la kulanto shakhsiyadka aad isku fikirka thiin, kuwaas oo wadaaga rabitaan laga siman yahay, way is-wadaysaa."

Heidi Hicks (Guriga Heidi) wuxuu helay dheefaha ugu badan ee CoP sanadihi la soo dhaafay. Waxay milicsatay, "Shaqadayadu waxay noqon kartaa mid aad u gaar ah in kasta oo aan la shaqeeyno caruurta oo aan la hadalno qoysaska, ma fahmaan waxa aan ku jirno. Lahaanshaha shabakada aan la leenahay daryeel bixiyayaasha kale waxay noo ahayd mid aad u wanaagsan." Heidi markii hore way ka cabsanayay. Waxay aad ugu mashquulsanayd maamulitaankada ganacsigeeda Daryeelka Ilmaha Qoyska waxayna u malaynaysay inay isku daydo hal kulan oo CoP ah. Waxay ahayd 10 sano waxayna aad u aaminsan tahay faa'iidooyinka isu-imaatinka CoP.

Kooxahan waaweyn ee hogamiyayaasha waxay rajeynayaan inay ku dhiirigeliyaan kuwa kale inay isku xirnaadan CoP bulshadooda. "Ku xirnow CCA degaankaaga ee WA iyo tababarahaaga. Si qoto-dheer usii dhexgalitaanka adigoo cilmi-baarlis ku samaynaysa khadka tooska ah, waa wax yar cabsi marka hore laakiin faa'iidooyinka ayaa ka miisaan badan shaqada iyo dadaalka." -Bonnie Cox

"Waxaan si weyn ugu mahadcelineynaa xubnaha Hurston County Family Child Care CoP iyo Macalimiinta Waxbarashada caruurnimada hore si ay noogu soo daraan dabaaldeggooda! Waad ku mahadsan tahay hogamintaada, iyo hababka badan ee mid kasta oo idinka mid ah u horumariyo dhaqanka daryeelka Washington State."

-Sandy Maldonado



Kheyraad

- Raadi Tababaraaga:

<https://childcareawarewa.org/find-your-coach/>

- Maqaalka:

<https://www.communityofpractice.ca/background/what-is-a-community-of-practice/>


<https://developingchild.harvard.edu/collective-change/learning-communities-in-action/community-of-practice-on-play/>

SOO BANDHIGA TABABARE IYO DARYEEL BIXIYE

Deb Walter

Daryeel Bixiyaha Early Achievers

Deb waxa ay ka shaqaynaysay Puddle Jumpers Family Child Care 34-kii sano ee la soo dhaafay. Waxay kusoo kortay Oklahoma, waxay ka qalin-jabisay Goddard College ee Plainfield Vermont, halkaas oo ay kula kulantay ninkeeda, Steve. Waxay dhaleen labo caruur ah, Shilo iyo Zoe. Waxay jeceshahay isu-imantinka bulshada, doon waditaanka, heesaha iyo beer samaynta! Farxadeeda ugu weyn waa dhisidda bulsho leh caruur iyo qoysas. Qoysas badan oo Puddle Jumpers ayaa kulmaan oo noqda saaxiibo nolol ahaaneed. Caawinta caruurta inay dhistaan xiriir adag iyada oo loo adeegsanayo ciyarta ay caruruто adeegsato dareenkeeda waa waxa uu ugu jeceshahay Deb oo ay sharaf u tahay inay qabato shaqadan maalin kasta.



Shelly Knight

Tababare Early Achievers:

Tababarayaasha Shelly ee Olympic Peninsula oo takhasus u leh xiriirkä dadka dhaladka ah. Way ku faraxsan tahay inay u adeegto bulshadeeda iyada oo ay waheliyaan daryeel bixiyayaal dadaalaya si ay ugu fidiyaan daryeel fiican caruurta. Waxay aad u jeceshahay inay taageerto qoysaska ku jira sanadaha carruurnimada hore, wakhtigaas oo ah mid qали ah oo muhiim ah. "In aan jecelaano oo aan wax barano caruurteena waa inaan daryeelno bulshadeena" waa maahmaah Dadka u dhashay Alaaska ee ay ku nooshahay. Shelly waxay in ka badan 30 sano kusoo jirtay dhinaca waxbarashada, waxay wax bartay Preschool, Head Start, iyo dugsiga hoose ee K-3 ee Alaska iyo Washington.



Sidee ayaad u qexi lahayd CoP?

Waa koox ka kooban daryeel bixiyayaal ah, agaasimayaasha/maareeyayaasha xarunta kuwaas oo isu-yimaada si ay u dhisaan cilaqaad, mawduucyo waxbarasho, shabakad, oo ay wada yeeshaan daraasado buug ama akhrinta maqaalo. Waxay noqon kartaa mid fool ka fool ah ama mid ka dhacda khadka tooska ah. Waxay ka caawin kartaa xalinta arrimaha bulshada iyadoo si wadajir ah arinta looga wada shaqeeyo. Mudada lagu jiro COVID midani waxay noqotay hab fiican oo la isku caawiyo. - Shelly

Maxay CoP kaaga micnaysan tahay?

Waxay ahayd koox waxbarasho oo taageero joogto ah. Waa arin gaar ah sababtoo ah mudada aan wada joognay, waxaan aragnay isbedelo badan sanadihi la soo dhaafay, waxaan ugasoo gudubnay wakhiyo adag si wadajir ah oo aan u dabaaldegnay guulo. Midani waxay ahayd qaybta ugu fiican ee Early Achievers. - Deb

Waa maxay faa'iidata Cop?

Waxaad awooodaa inaad la xiriirto dadka kale isla goobtaada. Waxay keeni karaan fikrado cusub iyo is-dhexgalka aadka loogu baahan yahay ee dadka waaweyn kadib markaad inta badan maalintaada la qaadato caruurta. - Deb

Sidee ayaad u bilaabaysaa COP kaaga?

Toban sano kahor, dhawr tababare aaya la hadlay daryeel bixiyeyaasha si ay u eegaan haddii ay xiisaynayaan inay bilaabaan CoP. Waxay ku dareen qeybo kamid ah ciyaaro madadaalo ah, isbarashada, iyo fursadaha qof walba si uu si fiican isu-baran karo. Xaqiiqdii waxay ka caawisay samaynta dareenka bulshada ee bulshadeena dhexdeeda. - Shelly

Waa maxay taladaada aad siinayso qof kasta oo ku fikiraya inuu bilaabo CoP?

Ku bilow ujeedada dhismaha bulsho, samayn cilaqaadr iyo isku xirnaasho. Plan fun activities to help pull folks out and get them together. Keenintaanka wax la xiriira unto ama wax ka farxin kara waa mid wanaagsan.

- Shelly



CoP ee Shelly iyo Deb (Thurston County) ayaa u dabaaldegay 10 sano!



Ku xirnaw Tababaraha Waxbarashada Caruurnimada Hore

Raadinta qof taageeri kara hadafyada oo ku siin kara talooyin iyo istaraatijiyooyinka ilmaha iyo koriinka xirfad leh? Wax badan ka ogaw oo ku saabsan hababka lagu hormarin karo daryeelka aad bixiso, waxqabadka ganacsigaaga, ama dhaqanka ka qaybgalka qoyskaaga. Tababarayaasha horumarinta xirfadeed ee ku saleysan xiriirka (Relationship-based professional developmen, RBPD) waxay ku siinayaan taageero mid kamid ah waxayna bixiyaan adeegyo tababar oo kala duwan oo la bedeli karo.

KA RAADI
TABABARAHAAAGA HALKAN